# Salaan waalid

Sidan ayaad u geli kartaan Aula!




## Aula waxaa loo isticmaalaa sida madal isgaarsiineed

Aula waa albaabkaaga isgaarsiinta dhijitaalka ah, ee xarumaha xanaanada, iskuulada, KKFO iyo naadiyada.

# Waxyaabaha muhiimka ah waxaan kuwada xirrraynaa Aula

Aula waxaad ka heleysaa dulmar dhamaystiran oo ku saabsan waxa muhiimka ah, ee ku saabsan nolol maalmeedka caruurtaada ee xarunta xanaanada, iskuulka, KKFO iyo/ama naadiga.

IWaxaa idiinku imaanaya fariimaha, ogaysisyada iwm iyo inaad ku qori karato imaantika/bixida, yaa kaxaynaya caruurta,diiwaan gelinta balamah joogtada ah iwm

Waxaan jecelahay, inaan Aula ugu xiriiro si kooban iyo inaan u isticmaalo wadaxiririrka muhiimka ah, si markaa shaqaalaha barbaarinta xooga ugu saaraan shaqada caruurta ay qabanayaan.

Waalid ahaan, waxaad leedahay mas'uuliyad madaxbanaan, ee ku saabsan waxaad qorto oo aad u gudbiso Aula. Xusuusnow inaad ilaaliso xogta gaarka ah ee midba midka kale leeyahay.

Xarunta xanaanada caruurta, iskuulka, KKFO iyo/ama naadiga mas'uul kama aha wada xiriirka waalidka.

Waxaan ku dhiirigelinaynaa qof kasta oo palaatfoormkan isticmaala,  inuu u isticmaalo si habboon oo ixtiraam leh. Hadafkayagu waa in dhamaan waalidiinta reer Kobanheegan ay isticmaali karaan Aula.

**Fadlan ogow in...**

... in Aula loo habayn karo si ka duwan, marka tusaale ahaan imaatinka/bixida, waxay u ekaan karaan kuwo ka duwan kan buug-yarahaan ku qoran.

... in Aula si joogto ah loo horumariyo iyada oo la cusbooneysiiyo, oo waxaa lagu daraa  horumarin yar iyo hawlqabadyo cusub.

## Dir oo hel fariimo xambaarsan nuxur xasaasi ah

Aula, waxaanu ku kaydinaynaa macluumaadka ilmahaaga si badbaado leh, marka waa inaad gasho MitID si aad u dirto oo aad u hesho farriimaha macluumaadka xasaasiga ah ama sirta ah.

Haddii aad dirto fariin leh macluumaad xasaasi ah ama sir ah, waa inaad u calaamadisaa mid xasaasi ah, si hab haboon loogu maareeyo.I

Xogta gaarka ah ee xasaasiga  iyo sirta ah waa, tusaale ahaan, macluumaadka ku saabsan:

- Lambarka CPR
- Arrimaha gaarka ah
- Macluumaadka caafimaadka
- Caqiidada diinta
- Jinsiyada iyo asalka qofka.

## Sawirada ku jira Aula

Xanaano-maalmeedka, iskuulka, KKFO iyo naadiga waxay isticmaali karaan sawiro iyo warbaahin kale oo qayb ka ah shaqada barbaarinta. Tani waxay ka dhigan tahay in sawirada iyo warbaahinta kale ee ilmahaaga lagu wadaagi karo Aula. Waalid ahaan, waxaad kaliya ka soo dejisan kartaa sawirada Aula si gaar ah loogu isticmaalo.

Fadlan la xidhiidh xarunta xanaanada carruurta, iskuulka, KKFO ama naadiga haddii aad wax su'aalo ah ka qabto isticmaalka sawirrada ama aad jeceshahay in sawirka ilmahaaga laga saaro.

# Gelida Aula (login)

### Ka gel Aula xaga app-ka




**1.** Soo deji app-ka **Aula ee waaldka iyo ardayda (Aula til forældre og elever)**

**2.** Fur app-ka oo dooro **waalid (Forælder)**

**3.** Dooro **MitID**

**4.** Ku gel **MitID-gaaga**

**5.** Dooro **waalid(Forælder ama kontaktperson)**

### Ka gel Aula xaga internetka (browser)




**1.** Gel **www.aula.dk**

**2.** Dooro **MitID** meeshan (Unilogin)

**3.** Ka dooro **MitID** halkan (loginvælgeren)

**4.** Ku gel **MitID-gaaga.**

# U samaynta qof xiriir ah, ama magac loogu yeero ilmahaaga


Bogga www.kk.dk/aula waxaad ka akhrisan kartaa wax badan oo ku saabsan sida loo abuuro qof la xidhiidha ilmahaaga gudaha Aula.

Waxaad sidoo kale samayn kartaa naaneysta naftaada ama ilmahaaga haddii aad leedahay magaca iyo cinwaan sir kuu ah..

# Marka ugu horeysa ee aad gesho Aula

- **Akhri oo ogolow gelitaanka xogta Aula**
  Akhri oo dhag sii "Anigu waxaan siiyay ogolaanshaha app-ka si uu u galo xogtayda gudaha Aula" (”Jeg giver app’en lov til at tilgå mine data i Aula”).
- **Samayso baaswoord ka kooban 6 nambar**
  Geli baaswoord, aad xasuusin karto, oo aad ku geli karto si sahlan.
- **Dooro ogaysiisyada**
  Dooro inaad rabto ogeysiisyada "Mobile" ama "email". Waxaad mar walba bedeli kartaa oo aad habayn kartaa dejinta ogeysiiska hoosta Profile-kaaga.
- **Ku gal sawirka faraha ama aqoonsiga wajiga**
  Dooro, haddii aad rabto inaad isticmaasho sawirka faraha ama aqoonsiga wejiga, si aad u gasho Aula mustaqbalka.
- **Go’aanso wadaagista macluumaadka**
  Dooro in macluumaadkaaga xiriirka adiga/caruurtaada lala wadaagi karo waalidiinta iyo carruurta kale ee Aula, adiga oo ku jawaabaya "Haa" ama "Maya" hoosta profile-kaaga. Haddii aad leedahay wax ka badan hal cunug, waa inaad u jawaabtaa cunug kasta. Mar walba waad bedeli kartaa oggolaanshahaaga.
- **Cusboonaysii macluumaadkaaga xiriirka**
  Hubi oo cusbooneysii haddii loo baahdo, macluumaadkaaga xiriirka ee hoosta profile-kaaga.
- **Buuxi kaadhka qoyska**
  Waxaad ka heli doontaa kaarka xubinnimada profile-kaaga hoostiisa. Macluumaadka kaadhka qoysku waa khaas, waana la bedeli karaa wakhti kasta.

# Hawlaha ku jira abka Aula




**Søg (Raadi)**
Halkan waxaad ka raadin kartaa macluumaadka Aula oo dhan.

**Barn/Børn (Ilmo/Caruur)**
Guji si aad u balaadhiso, oo ay suurtagal kuugu noqoto, Dooro ilmaha aad rabto inaad u aragto waxa ku jira.


**Profil (Profil-ka)**
Halkan waxa aad ka heli doontaa macluumaadka xidhiidhka, kaarka xubinnimada iyo ogolaanshaha, iyo sidoo kale habayn liiska hoose oo qaabaysa ogeysiisyada.

**Opret (Samee(Abuur))**
Halkan waxaad ku abuuri kartaa qoraalo, dhacdooyin, fariimo ama albamo gudaha meesha sawirada

**Menu/Widgets (Liiska/Minuuga)**
Halkan waxaad ku balaadhin kartaa liiska oo waxaad ku arki kartaa dhammaan modules-yada Aula iyo minuu-yada, kuwaas oo ah marinka aad ka heli karto nuxurka aaladaha kale.

**Bundmenu (Liiska hoose)**
Waxaad habayn kartaa cutubyada iyo liis-yada aad rabto inaad ku muujiso liiska hoose. Waxa aad tan samaynaysaa adiga oo fartaada ku haya liiska hoose (riix dheer) ama adiga oo gelaya:Profile-ka> Diyaarinta> Habee liiska hoose

# Shaqada imaantinka/bixida (Komme/gå)




**Dagens overblik (Dulmarka maanta)**
Halkan waxa aad ku arki kartaa heerka ubadkaaga, tusaale. Fasaxa/waqtiga firaaqada, oo hubi macluumaadka soo gelida/kabixista

**Fravær (Maqnaashaha)**
Halkan waxaad ku soo wargelin kartaa ilmahaaga buka, ku qeex fasaxyada/wakhtiga fasaxa iyo ka jawaabista codsiyada fasaxa.

**Ikhtiyaaro badan:**

**Tider (Waqtiyada)**
Halkan waxa aad ku diwaangelin kartaa wakhtiyada ilmahaaga, oo aad u cayimi kartaa cida ilmahaaga soo kaxaynaya, tusaale ahaan awoowe. Waxaad sidoo kale ku dari kartaa mulaaxado la xidhiidha maalinta. Haddii aad caruur badan leedahay, magacyadooda ayaa soo bixi doono.

**Henteansvarlige (Mas'uuliyada kaxaynta ilmahaaga)**
Halkan waxaad ku qori kartaa , dadka qaadi kara ilmahaaga, tusaale. awoowe.


**Åbningstider og lukkedage (Saacadaha furitaanka iyo maalmaha xidhitaanka)**
Halkan waxa aad ku arki kartaa saacadaha ay furan yihiin xanaanada caruurta, KKFO ama naadiga.

**Imaatinka/ bixitaanku** waxay u ekaan karaan kuwo ka duwan sida halkan ka muuqda, maadaama laga yaabo in xannaanada carruuртaada, KKFO ama naadiga ay u dejiyeen Aula si ka duwan

## Ku dar sawirka ilmahaaga Profile-ka

Fadlan dooro sawir muuqaal ah oo si dhow ugu eg ilmahaaga, si shaqaalaha iyo caruurtu ay si sahlan uga heli karaan ilmahaaga shaashada hore ee laga gelo, tusaale ahaan.

1. Guji **Profil-kaaga**
2. Dooro macluumaadkaaga xiriirka
3. Dooro **Bedel sawirka** ku xiga magaca ilmahaaga
4. Dooro sawir, kadib **Keydi** isbedelkii aad samaysay.




## Ma u baahan tahay caawimaad Aula?

La xidhiidh xarunta xanaanada caruurta, iskuulka, KKFO ama naadiga, hadii aad u baahan tahay caawin la xidhiidha xaga Aula